REPUBLIC OF SOMALILAND

THE PRESIDENCY

REF JSL/M/SAXEEX0016/2000

DATE 8th December 00
Hargeisa

Xeer-Madaxweyne No: 16/2000

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu arkay: Go'aanka GW/KF-12/143/2000 ee 12/11/00 uu Golaha Wakiiladu ku ansixiyey Xeer 16/2000 ee 12/11/2000, kuna saabsan Aftida Dastuurka iyo go'aanka ansixinta Golaha Guurtida ee GG/JSL/K-121AAD/G-2/11/2000 ee 22/11/2000.

Markuu tixgeliyey: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland

Wuxuu

Soo saaray xerkan oo lagu faafinayo dhaqan-galka xeerka No: 16/2000 ee 12/11/2000 kuna saabsan Aftida Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

Waxaana lagu soo saari doonaa faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Allaa Mahad Leh,

REPUBLIC OF SOMALILAND

Maxamed Ibraahim Cigaal
Madaxweyne

Pl/etc incoming

Jamhuuriyada Somaliland

GOLAHA WAKIILADA

Xarunta, Hargeysa

Republic of Somaliland

HOUSE OF REPRESENTATIVES

HQ, Hargeisa

Our ref: ~~GW/KF-12/~~ 1143 /2000.

Date: ~~12/11/2000~~

GO'AAN ANSIXIN XEERKA AFTIDA DASTUURKA XEER LR 16.

GOLAHA WAKIILADDA JSL

MAHKUU AHKAY „Qodobada 125'aad iyo 130'aad ee Dastuurka Qaranka.

MAHKUU DHAGAYSTAY „Soo jeedinta guddiga shuruucda iyo garsoorka iyo dooda mudanayaasha ee ku saabsan xeerkan

MAHKUU WIXGELIYEY „Baahida loo qabo xeerkan, iyadoo gabo-gabo ku dhawdahay mudadii ku dhaqanka Dastuurka.

MAHKUU U CODEEYEY „Ansixinta mashruuc-sharciga Aftida Dastuurka Fadhigii 13/11/2000 ee ay goob joog ahaayeen 53 Mudane.

Wuxuu cod aqlabiyad ah (43-cod) ee gacan taag ah ku ansixiyay xeerka aftida Dastuurka Xeer Lr. 16'aad halka 3 Mudane ka diideen 6 Mudane ee kalena ka aamuseen guddoomiyuhuna aanu cod biirin sida caadada ah

ALLAA MAHAD LEH

(Maxamed Xuseen Ismaan)
XOGHAYAHA GUUD EE GOLAHA WAKIILADDA

(Cabdi/dir X.Ismaciil Jirde)
KS-GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILADDA JSL-

XEERKA AFTIDA DATUURKA JSL

MADAXWEYNAHA JSL

Marku arkay : Qod.151 labarkiisa 1 aad ee dastuurka oo ahaan

Marku arkay : Qod. 152 ee dastuurka oo waajib ka dhigaaya

in la soo saaro xeerka

Wuxuu Soo Saarayaa

Xeerkan Soo Socda: -

QAYBTA I

UJEEDADA GUUD

QODOBKA 1AAD

UJEEDADA AFTIDA

Aftida xeerka qeexaayo, muwaadin kasta wuxuu ku dhiibayaa cod uu ku ogolaanaayo ama ku diidaayo Dastuurka.

QODOBKA 2AAD
XAQA CODKA IYO KU ISTICMAALKIISA

1. Muwaadin kasta oo buuxiya shuruudaha ku tilmaaman xeerkan Qod.(6Aad) Wuxuu Yeelanayaa hal cod oo uu ka dhiibanaayo degmada uu ku sugan yahay:
2. Codbixintu waa mid shakhsi, xor, toos ah, loona wada siman yahay.

QODOBKA 3AAD
GOOBTA CODBIXINTA

Si loo suurta geliyo hawsha cod-bixinta aftida, waxa lagu degmo kasta loo sii kala qaybinaayo goobo cod-bixineed

QODOBKA 4AAD

MAAMULKA AFTIDA

1) Goobta Cod-bixinta ;
2) Xafiiska Aftida Ee degmada ;
3) Xafiiska Dhexe Ee Aftida.

Xafiiska aftida ee Degmada waa magaalo madaxda degmo kasta. Xafiiska dhexe ee aftiduna wuxuu noqonayaa magaalo madaxda dalka ee Hargeiysa.

QODOBTA 5AAD

TAARIIKHDA QABASHADA AFTIDA.

Hawlaha cod-bixinta ee ku waajahan aftida, waxay soconaysaa hal maalin o Keli Ah, Waxaana lagu codaynayaa xeer madaxweyne oo lagu soo saaro faafin rasmi ah ugu Yaraan lixdan maalmood ka hor maalinya aftida .

QAYBTA II
SHURUUDAHA QOFKA KA QAYB GELINAYAA AFTIDA

QODOBKA 6AAD
XAQA CODBIXINTA

Waxaa xaqa codbixinta aftida xaq u leh qof kasta **(Lab & Dhedig)** oo buuxiya shuruudaha soo socda:-

1) Inuu yahay muwaadin u dhashay somaliland
2) In aanay da'diisu ka yarayn 18 jiir.
3) In aan lagu caddayn waali.
4) In aanu ku jirin xabsiga xukun maxkamaded awgeed.

QODOBKA 7AAD

AQOOSIGA QOFKA LEH XAGA CODBIXINTA

aqoonsiga qofka leh xaqa cod-bixinta waxaa go'aan ka gaadhaya guddiga goobta cod-bixinta, iyadoo loo raacaayo hab gaaban sida uu tilmaamayo.

QAYBTA III

QODOBKA 8 AAD

GOOBAHA CODBIXINTA

20 Maalmood ku hor taariikhda aftida, guddiga ee aftidu kadib marka uu helo talooyinka , guddomiyaha gobolka , wuxuu soo saarayaa:-

1) Meelaha - goobaha codbixinta ee degmo kasta, oo lagu salaynaayo baaxadda iyo dadka lagu qiyaasaayo inay ku noolyihiin:
2) Tirada goob kasta ka codbixinaayo oo qiyaas ahaan loogu tala gelaayo, 1000-1500 ee qofood.

QODOBKA 9 AAD

DHISMAHA GOOBAHA CODBIXINTA

Guddiga goobta codbixintu wuxuu ka koobnaanayaaa:-

1) Guddoomiye,
2) Hal kaaliye – oo yeelan kara xil guddoomiya ku xigeen,
3) Hal xoghaye

Xubnaha kar ku qoran waxa magacaabanaaya guddoomyaha gobolka oo dhegeystey talada duqa ama guddoomiyaha degmada .

Marka ay lama dhaafaan noqoto inta ay codbixintu socoto in la
Bedelo kaaliyaha lama xoghayaha, guddoomiyaha ayaa ku bedelaaya qof kale oo laga dhex xulo dadka ku sugan goobta oo leh shuruudaha
codbixinta ee ku tilmaaman xeerka qod**.(6aad).**
Haddiise uu noqdo ka la bedelayaa guddoomiyaha gudiga goobta,
iyadoo la raacaayo habka kor ku qoran, waxaa bedelaaya guddoomiyaha goblka.

QODOBKA 10 AAD

DHISMAHA XAFIISKA AFTIDA EE DEGMADA

Guddiga xafiiska aftida ee degmadu wuxuu ka koobmayaa:-

1) Guddoomiye,
2) Saddex kaaliya oo ku ugu da'da weyni uu yeelanaayo xilka gudoomiye ku xigeenka,
3) Hal xoghaye
4) Saddex tiriyayaal ah.

Xubnaha xfiiska aftida ee degmada, waxaa magacaabayah guddiga qaranka ee aftidkadib Marka uu dhegaysto talada goomiyaha gobolka marka ay la soo gudboonaato arrimo deg deg ag oo khasab ka dhigaaya waxa ka bedelka masuuliinta sare ku qoran waxaa tallaabo ka qaadaaya gubolka .

QODOBKA 11 AAD

DHISMAHA XAFIISKA DHEXE EE AFTIDA

Guddiga xafiiska dhexe ee aftida wuxuu ka koobnaanayaa:-

1) Guddoomiye,
2) Guddoomiye ku xigeen,
3) Saddex kaaliye
4) Hal xoghaye .

Xubnaha guddiga xafiiska dhexe ee kor ku qoran waxaa lagu magacaabayaa xeer madaxweyne.

QODOBKA 12 AAD

WARGELIN XILKA IYO DHAARTA

Qof kasta oo loo magacaabo inuu ka noqdo xubin maamulka Aftid lama cafin karo, haddii aanu la iman sabab lagu qanci karo ka cafiska waxaa awood u leh maamulkii magacaabistiisa lahaa.

Magacaabidda waa in la gaadhsiiyaa dadka ay khusayso ugu yaraan 15 maalmood ka hor taariikhda Aftida.

Inta aanay xilka qaban dhammaan xubnaha maamulka Aftida eek u xusan qodobka 4aad ee xeerkan, waxay marayaan dhaarta soo socota: (WAXAAN MAGACA ILAAHAY KU MARAYAA IN AAN XILKA LA II DHIIBAY EE AFTIDA DASTUURKA KU GUDAN DOONO SI NIYAD SAMI, DAACADNIMO, DHAWRI DOONANA XEERAN).

QODOBKA 13 AAD

DIYAARINTA GOOBAHA CODBIXINTA, XAFIISYADA

DEGMOOYINKA IYO KAN DHEXE EE AFTIDA

1. Goobaha Codbixinta iyo xafiisyada degmooyinka waxaa diyaarintiisa loo xil saarayaa, Duqa ama Guddoomiyaha Degmada.
2. Xafiisyada Dhexe ee Aftida waxaa diyaarintiisa loo xilsaarayaa Guddiga Qaranka ee Aftida.

Waa in masuuliyiinta kor ku qoran ay 20 maalimood ka hor taariikhda Aftida ku wargeliyaan dadweynaha:-

1. Tirada iyo meelaha goobaha codbixinta;
2. Wuxuu u isticmaalayaa daabacyo lagu dhejinaayo goobaha kulanka dadweynaha Boodhadh, shirar, kulamo iyo Qalabka Warbaahinta.

QAYBTA IV

QALABKA CODBIXINTA

QODOBKA 14 AAD

QALABKA GOOBTA CODBIXINTA

Guddiga Qaranka ee Aftidu wuxuu goob kasta ee codbixin u diyaara qalabka soo socda:-

1. Hal nuqul oo Dastuurka.
2. Hal nuqul oo Xeerkan ah.
3. Kolay lingaxan oo ay ku jirto shaabada goobta codbixinta, oo wadata khad iyo khadeeye.
4. Kolay lingaxan oo ay ku jiraan warqadaha codbixinta.
5. Sanaadiiq kuwa codka lagu rido.
6. Saxaaradda lagu ururinaayo qalabka dhacdooyinka hawsha codbixinta.
7. Tiro diiwan ah oo lagu qoraayo dhacdooyinka hawsha codbixinta.
8. Hal quraarad oo ah khadka aan tirtimi karayn.
9. Tiro halkudhigyo daabacan oo dadweynaha loogu tilmaamayo habka loo codbixinaayo.
10. Qalab xafiis iyo wixii kale ee loo baahdo.

Guddiga Aftidu wuxuu kale uu u diyaarinayaa xafiisyada Aftida ee Degmooyinka iyo kan Dhexe kolayo lingaxan ay ku jiraan:-

1. Shaabadda, khad iyo khadeeyahood.
2. Warqadaha Tirinta.
3. Diiwaano.
4. Qalabka Xafiis.
5. Daabacaadyada loogu baahan yahay qalabka hawsha Aftida ee sare ku qoran waa in lagu ururiyaa saxaarad xidhan oo lingaxan ay la socdaana sanaadiiqdii lagu ridaayay codka.

   Waa in Duqayda ama Guddoomiyaasha Degmooyinku ay gaadhsiiyaan wakhti ku haboon.
   Guddiga Qaranka ee Aftidu wuxuu kale ee uu u diyaarinyaa Duqayda ama Gudoomiyayaasha Degmooyinka, wixii qalab ah ee lagu fulin lahaa hawsha codbixinta oo kayd ah, la isticmaali karo marka goobaha codbixinta lagu helo codsi uu saxeexay Gudoomiyaha Guddiga goobta oo shaabadaysan, ku muujiyeyna sababta baahida.

QODOBKA 15 AAD

ISKU MID AHAANSHAHA QALABKA CODBIXINTA

Qalabka hawsha codbixinta shaabadaha goobaha codbixinta, Xafiisk Aftida, warqadaha codbixinta, Diwaanada, Sanaadiiqda, Waraaqaha Tirinta waa in ay isku nooc ahaadaan dalka oo dhan

Shaabaduhu waxay yeelanayaan lambaro u kala gaadh ah goobaha Codbixintga oo taxan.

Warqadaha Codbixinta ee Aftida waxay ka samaysan yihiin warqad cad oo bolleetooyin ah, midkiibana yahay Boqol xaashi cad ka hadhana bolleetada uu leeyahay lambar u gaar ah oo taxan.

QODOBKA 16AAD

QOLALKA IYO SANAADIIQDA

Goob kasta oo codbixin, wuxu Duqa ama Guddoomiyaha Degmadu ku diyaarinayaa Hal qol oo dhexda Daah ku kala xidhan si suurta galinaysa qarsoodida codka.

Qolka labadiisa qaybood waa in la dhigaa laba sanduuq, mid uu cagaaran yahay looguna tala galay in lagu rido, warqadaha codbixinta ee ogol Dastuurka, kan kale casaan yahay, looguna tala galay in lagu rido warqadaha Codbixinta ee diidan Dastuurka.

Sanduuqa Cagaaka ah dushiisa waa in lagu dhigaa (HAA) kan casaanka ahna (MAYA).

QODOBKA 17AAD

TILMAAMIDA HABKA CODBIXINTA

Nuqul ah haldhigga ku tilmaaman Qod. 14aad lamabarkiisa qaad, oo lagu dhejinayo meel ay dadweynuhu ka arki karaan qolka codbixinta, dibadeeda iyo gudaheeda, sidoo kale waa in lagu qol kasta gudihiisa

QAYBTA V

CODBIXINTA

QODOBKA 18 AAD

GAADHSIINTA QALABKA CODBIXINTA

Duqa ama Guddoomiyaha Degmadu:-

1. Waa inuu saxaaradda iyo sanaadiiqda ku gaadhsiiya goob kasta oo codbixinta 6da (lixda saac) ee subaxnimo ka hor waqtiga Aftidu dhacayso.
2. Waa in uu gaadhsiiyaa isla maalintaa ka hor 4ta (afar saac) ee galabnimo, saxaaradda khusaysa Xafiiska Aftida ee Degmadda.
3. Waa in uu hubiyaa in la gaadhsiiyey goob kasta Nuqulkii Magacaabidda xubnaha Guddiga goobta codbixinta ama kan Xafiisk Aftida ee degmadda.

QODOBKA 19 AAD

GAADHSIINTA QALABKA CODBIXINTA

Marka uu Guddoomiyaha Goobta codbixinta uu helo qalabka ku xusan Qodobka 18aad ee xeerkan:-

1. Wuxuu bilaabayaa dhisidii goobta codbixinta, isugu yaadhayaa, Kaaliyaha iyo Xoghayaha.
2. Wuxuu xaqiijinaya iyadoo ay goobjoog ka yihiin xubnaha kale lingaxa saxaaradda, uu ku jiro qalabka codbixinta, kadibna furayaa hubinayaa inuu qalabku ku dhan yahay.
3. Markuu u sugnaado xunaha la hubiyaan lingaxa, wuxuu furayaa kolayga ay ku jirto shaabadda goobta codbixinta, wuxuu ku ridayaa saxaaradda sare ku qoran, lambarka shaabadda goobta codbixinta iyo kan warqadaha codbixinta, waxaa lagu qorayaa diiwaanka.
4. Wuxuu xaqiijinayaa isaga iyo xunaha kale, in ay sanaadiiqdu madhan yihiin, kadibna dib ayuu u xidhayaa oo uu u lingaxayaa, uu dhaafayaa oo kaliya daloolka lagu rido warqadaha codbixinta, sanduuq kastana waa in uu dhigaa meesha qolka loogaga tala galay.
5. Wuxuu soo bandhigayaa Hal Nuqul oo ah Dastuurka JSL.
6. Wuxuu qalabka intiisa kale u dhiibayaa xoghayaha.
7. Wuxuu hubinayaa in qalabka codbixinta loo agaasimay si suurta gelin kara habsami u socodka hawsha Aftida.

Marka hawlaha sare ku taxan lagu fuliyo wakhtiga ugu yare ee suuragalka ah, kadib wuxuu guddoomiyuhu ku dhawaaqayaa furitaanka codbixinta.

QODOBKA 20 AAD

AWOODA ILAALINTA NABADGALYDA

Guddoomiyaha Guddiga goobta codbixinta:-

1. Wuxuu u xil saran yahay sugidda ammaanka goobta codbixinta ee ay dadweynuhu ku soo qulqulaayo, iyo agagaarkeeda.
2. Wuxuu u adeegsanayaa Ciidanka Nabedgelyada oo ka dheeraynaya ama xidhayo qofkasta oo la yimaad falal wax yeelayn kara habsami u socodka hawsha Aftida amaba dembi gala.
3. Hawl wadeenada Hay'addaha Dawladda iyo Taliyayaasha Ciidanka Nabadgelyadu, waxay fulinayaan awaamiirtiisa oo kaliya, si ay codbixiyayaashu ugu suurto gasho gelidda goobta codbixinta.
4. Awoodda kor ku xusan waxa leh oo kale, Gudoomiyaasha Xafiisyadda Aftida degmada iyo kan dhexe.

QODOBKA 21 AAD

GALITAANKA XAFIISKA CODBIXINTA AFTIDA

1. Marka laga reebbo xubnaha Guddiga Codbixinta, waxaa keliya oo geli kar goobta qofka u leh xaq codbixinta.
2. Codbixiyaashu waxay goobta codbixinta u gelayaan markiiba qof, waxayna dhawrayaan nidaamka iyo sida ay isugu xigaan una kala horeeyaan.
3. Codbixiyaasha goobta codbixinta lama geli karaan Hub ama qalab kale oo wix dhibi kara.

QODOBKA 22 AAD

TALAABOOYINKA KA HOREEYA CODBIXINTA

Muwaadin kasta wuxuu ka codbixin karaa goobta uu ku sugan yahay cadeeyana:-

1. Magaciisa iyo Da'diisa.
2. Laga aqoonsado goobta inuu yahay qof leh xaqa codbixinta, Guddiga goobta ayaa go'aan ka gaadhaya si deg deg ah, hab gaaban, tixgalinayana qorraallo marag iyo wax kasta lagu qanci karo.
3. Gacanta bidix ama haddii aanay jirin tan midigta amaba haddii labaduba maqan yihiin, waa in codbixiyaha inta aan la siin warqadda codbixinta, laga mariyaa meel kale oo la arki karo jidhkiisa ka mid ah, oo ah khad aan tirmayn.

QODOBKA 23 AAD

CODBIXIYAHA AAN AWOODI KARIN BIXINTA CODKA

1. Waxa codbixinta dhiiban kara qofka xaqa u leh ee taga goobta codbixinta.
2. Qofkii codkiisa aan dhiiban karin iin jidhkiisa ka muuqata awgeed, loogana aqoonsaday goobta codbixinta in aanu codkiisa bixin karin wuxuu guddoomiyuhu u ogolanayaa inuu qof ku kaalmeeyo oo uu codbixiyuhu ku kalsoon yahay.

Dhacdadaa waa inuu xoghayuhu ku qoraa diiwaanka, uu tilmaamana sababta loogu ogolaaday magaca qofkaas iyo kan kaalmeeyeyba.

QODOBKA 24 AAD

HABKA CODBIXINTA

Ka dib marka la soo af jaro hawlaha uu qeexayo qodobka 22aad ee xeerkan:-

1. Wuxuu Guddoomiyuhu mid mid u siinayaa codbixiyaasha warqada codbixinta lagu dhuftay shaabadd goobta, laga jarayna baleetada ay isku lamber xigaan.
2. Codbixiyuhu waa inuu la tagaa qayb ka mid ah qolka codbixinta loogu tala galay midkood.
3. Codka ogol Dastuurka waxaa warqadda codbixinta lagu ridayaa sanduuqa (CAGAARKA) ka diidana sanduuqa (CASAANKA).
4. Haddii ay warqadd codbixiyaha la siiyey ay ceebaysan tahay, wuxuu guddoomiyaha waydiisan karaa mid kale, tii horena u celinayaa.
5. Guddoomiyuhu wuxuu goobta Aftida ka saari karaa, codbixiyaha si ula kac ah ugu raago, codbixinta, laga soo celinayaana warqadda codbixinta.
6. Codbixyaha laga saaray goobta codbixinta waxaa loo ogolaan doonaa marka inta joogta ay ka dhammaat goobta.
7. Codbixiyaha lagu helo:-
    A. Hal warqad codbixin ka badan.
    B. Warqad ka duwan nooca la isticmaalayo.
    C. Inuu hore u codeeyey.

Guddoomiyuhu wuxuu ka qaadayaa warqadaaha uu haysto una dhiibayaa Ciidanka Nabedgelyada si looga qaado tallaabada sharci eek u haboon arrintiisa oo noqon karta maxkamadayn.

Haddii lala kulmo xaaladaha sare ku xusan, waxa lagu qorayaa diiwaanka la raaciyaana:- magaca codbixyaha, warqadaha codbixinta ee qofka laga qaado, waa inay saxiixaan Guddoomiyaha iyo

ugu yaraan Hal xubin ka mid ah xubnaha guddiga goobta, waxaana lagu ridayaa kolayga u gaar ah.

QODOBKA 25 AAD

SAACADAHA CODBIXINTA

Waxay Hawsha codbixintu bilaabmaysaa 6da subaxnimo si xidhiidh ahna u soconaysaa ilaa 6da fiidnimo. Baahi darteed waxaa codbixinta la wadi karaa ilaa 10ka fiidnimo.

Hase yeeshee inta ay codbixiyaashu hor tuban yihiin goobta codbixinta lama xidhi karo hawsha codbixinta.

QODOBKA 26 AAD

DHAMMAADKA HAWLAHA GOOBTA CODBIXINTA

Dhamaadka hawsha ku qoran qodobada sare ee Xeerkan, Gudoomiyuhu wuxuu si hakad la'aan ku dhaqaaqayaa hawlaha soo socda:-

1. Ku dhawaaqayaa codbixintii Aftida in ay xidhan tahay.
2. Xidhayaa lingaxayaa sanaadiiqda codbixinta, lingaxa dushiisa ku dhufanayaa shaabadda goobta codbixinta, saxiixayaana Guddoomiyaha iyo xubnaha kale ee Guddiga goobta.
3. Hubinayaa diwaankana ku qorayaa tirade warqadaha codbixinta ee la isticmaalay, isagoo ka eegaya bolleetooyinka ee laga jaray jeexyada ku hadhay
4. Hubinayaa diiwaankana ku qorayaa tirade warqadaha codbixinta ee looga qaaday codbixiyayaasha:-
    b. Iyaga oo xumaan ama aan dhammayn.
    t. Codbixiyaasha oo ulakac ugu raageen codbixinta.
    j. codbixiyaasha oo lagu helay Hal warqad codbixin ka badan.
    x. codbixiyaasha oo lagu helay warqad codbixin aan waafaqsanayn kuwa sharciga ah.
    kh. La ogaaday inay hore u codbixiyeen.
5. Hubinayaa Diiwaankana ku qoraya tirade warqadaha ee aan la isticmaalin.
6. Hubinayaa diiwaankana ku qorayaa, isaga oo sal uga dhigaya dhacdooyinka kor ku qoran, tirade dadka dhab ahaan codbixiyey.
7. Xidhayaa diiwaanada hawsha goobta codbixinta.
8. Daabacyadda kor ku ridayaa kalayga khuseeye, una xidhayaa u lingaxayna habka uu tilmaamayo lambarka 2aad ee qodobkan.

9. Ku ridayaa shaabadda goobta codbixinta kolayga khuseeya, lingaxa dushiisana la saarayaa saxiiyada uu tilmaamayo lambarka 2aad ee qodobkan.
10. Ku ridayaa kolayada saxarad uu xidhayo, lingaxayaana dushiisana waxaa la saarayaa saxiixyada ku tilmaaman lambarka 2aad ee qodobkan.
11. Saxaaradaha wuxuu raacinayaa sanaadiiqda codbixinta.

QODOBKA 27 AAD

JOOGISTA XUBNAHA GOOBTA CODBIXINTA

Dhammaan xubnaha guddiga goobta codbixinta, waa in ay joogaan inta ay socoto hawsha codbixintu, waa loo ogol yahay maqnaansho gaaban markiiba Ha l, xubin, hase yeeshee waxay ku xidhan tahay ogolaanshaha guddoomiyaha goobta.

QODOBKA 28 AAD

DIIWAANKA GOOBTA CODBIXINTA

Diiwaangelinta hawlaha goobta Aftida waa in laga sameeya saddex nuqul ay wada saxeexaan xubnaha Guddiga goobta. Hal Nuqul waxaa loogu tala galay xafiiska Aftida ee degmada si uu uga guto hawshiisa, 2da kalena duqa ama gudoomiyaha degmada.

QODOBKA 29 AAD

GAYNTA IYO DHIIBIDDA QALABKA GOOBTA

Marka ay soo gabagabowdo hawlaha ku tilmaaman qodobada sare, guddoomiyaha oo ay weheliyaan ugu yaraan xubin ka mid ah Guddiga goobta Codbixinta, ay ilaalnayaana ciidanka Nabedgelyadu, wuxuu durbadiiba u qaadayaa saxaaradda ay ku jiraan qalabka ku xusan Qodobka 26aad ee Xeerkan iyo sanaadiiqda codbixinta, geynayaana Xafiiska Aftida ee Degmada.

Xafiiska Aftida ee Degmadu marka loo dhiibayo saxaaradda iyo sanaadiiqyada, waa inuu hubiyaa in ay u dhan yihiin lingaxa, laguna qoraa diiwaan 2ba Nuqul ah, oo mid u qaato Gudoomiyaha Guddiga Goobta Codbixinta, ka kalena Xafiiska Aftida ee Degmada.

Waa inuu Guddoomiyaha Guddiga Goobta Codbixinta isla markaaba u dhiibaa Duqa ama Guddoomiyaha Degmada 2da Nuqul ee diiwaanka goobta codbixinta eek u xusan Qodobka 28aad.

QAYBTA VI

HAWLAHA XAFIISKA AFTIDA EE DEGMADA

QODOBKA 30 AAD

DHISIDA XAFIISKA AFTIDA EE DEGMADA

Markuu Guddoomiyaha xafiiska Degmada ee Aftidu uu helo qalabka ku tilmaaman qodobka 18aad ee xeerkan:-

1. Wuxuu ku dhaqaaqayaa dhisidda xafiiska Aftida ee Degmada, isugu yeedhayaa kaaliyayaasha, xoghayaha iyo tiriyayaasha.
2. Markuu xaqiijiyo isaga iyo xubnaha kale ee xafiiska dhammida lingaxyada,wuxuu furayaa kolayga ay ku jirto shaabadda, ka soo saaray, hubinayaana, qalabka ku jira.
3. Markuu xaqiijiyo isaga iyo xubnaha kaleba dhammida lingaxa la saaray, wuxuu furayaa kolayga ay ku jirto shaabadda xafiiska, kuna qorayaa lambarkeeda diiwaanka.
4. Wuxuu qalabka kale uu u dhiibayaa xoghayaasha xafiiska Aftida Degmada. Xafiiska Aftida Degmada. Xafiiska Aftida ee Degmadu wuxuu sugayaa soo gaadhitaanka qalabka uu tilmaamayo qodobka 26aad ee xeerkan.

QODOBKA 31 AAD

QABASHADA QALABKA GOOBTA CODBIXINTA

Xafiiska Afida ee Degmadu, isagoo raacaya farqada 2aad ee qodobka 29aad ee xeerkan, ayuu qabashada saxaardaha iyo sanaadiiqda goobta codbixinta ayuu sida loo soo kala horeeyey u kala hormarinayaa.

QODOBKA 32 AAD

XIDHIDDA XAFIISKA AFTIDA EE DEGMADA

Lama xidhi karo Xafiiska Aftida ee Degmada ka hore inta aanay soo gaadhin ama aanay ka tirsan dhammaan qalabka goobta codbixinta ee Degmada. Xafiiska inta uu xidhan yahay cidna gudihiisa kuma jiri karto, Ciidanka Nabedgelyadu iyagoo fulinaya amarka Guddoomiyaha ayey ka ilaalinyaan dibadda.

QODOBKA 33 AAD

BILAWGA HAWLAHA TIRINTA.

Hawlaha tirintu waxay bilaabmaysaa 8da subaxnimo ee maalinta xigta tan Aftida, iyadoo la sii dhisayo xafiiska Aftida ee Degmada, lama bilaabi karo tirinta goob codbixin ilaa ay ka dhammaanayaan hawlaha faraha lagula jiro.

Tirinta goobta codbixinta kahor ,wuxuu gudoomiyuhu furayaa, saxaarada ,hubinayaa lingaxa wuxuu kale ee uu hubinayaa lingaxyada kolayada saxaarada ku jira iyo kuwa sanaadiiqda codbixinta.

Gudoomiyuhu wuxuu cod dheer ku sheegayaa:-

- Lambarka u gaarka ah goobta codbixinta iyo meesha ay ku taal.
- Wuxuu cod dheer ku sheegayaa tirada dadka dhab ahaan ka codbixiyey goobta ee uu muujinaayo isla diiwaan goobtaas.

QODOBKA 34 AAD
KALA SHAANDHAYNTA WARQADAHA CODBIXINTA.

Dhammaadka hawlaha ku xusan qodobada hore Guddoomiyuhu wuxuu ka goynayaa lingaxa oo uu furayaa sanaadiiqda Cagaarka ah, ay ku jiraan warqadaha codbixinta ee ogolaaday Dastuurka, iyadoo gacan ku siinaayo Hal kaaliye.

Waxaa warqadaha codbixinta ee ku jira sanaadiiqda cagaarka ah laga soo saarayaa midba mar, la hubinayaa, la tirinayaa lana dhigayaa meel gaadh ah, iyadoo lagula dhawaaqayana cod dheer, hadba tirade guud ay gaadhaan warqadha codbixinta ee ogol Dastuurka.

Marka la dhameeyo kala shaandhaynta warqadaha codbixinta ee ogol Dastuurka waxaa lagu celinayaa sanaadiiqdoodii iyadoo la lingaxayo. Kuwa aan ansaxa ahayna lagu xidhayo kolay gaar ah, xoghayuhuna hadba calaamaysanayo tirade codadka. Ka dib marka uu kaga gooyo lingaxa guddiga hortiisa, guddoomiyuhu wuxuu furayaa sanaadiiqda casaanka ah, oo ay ku jiraan warqadaha codbixinta ee diiday Dastuurka, iyadoo la raacayo habka ku xusan farqadda hore

Warqadaha codbixinta waxaa taaban kara oo keliya xubnaha Guddiga.

QODOBKA 35 AAD
WARQADAHA CODBIXINTA EE AAN ANSAXA AHAYN.

Waxaan ansax ahayn, waraqadaha codbixinta:-

1. Ay ka maqan yihiin shaabadda goobta codbixinta.
2. Kuwa ay ku yaaliin, saxeex, magac ama calaamado kale ee uu codbixiyuhu ku qoray gacantiisa.

QODOBKA 36 AAD
WADA JOOGISTA XUBNAHA XAFIISKA

Mudada ay socoto hawlaha tirinta warqadaha codbixinta waa in ay xubnaha xafiiska aftida ee dagmadu wada joogaan .waxa laysku ogolyahay maqnaasho gaaban oo sababaysan, oo markiiba Hal qof ah, oo haysta ogolaansho guddoomiyaha ah.

QODOBKA 37 AAD
GO'AAN KA GAADHIDDA CABASHADA

Dhammaadka hawlaha kala shaadhaynta warqadaha codbixinta, wuxuu xafiiska Aftida ee degmada guddigiisu go'aan Hal dheeri ah kaga gaadhayaan cabashooyinka laga keenay goobta codbixinta oo qoraal ah intii ay hawshu socotay iyo ka diba.

QODOBKA 38 AAD
HUBINTA NATIIJADA GOOBTA CODBIXINTA

Dhammaadka hawlaha ku xusan qodobada hore ee xeerkan, Guddoomiyaha guddiga xafiiska ee Aftida ee Degmaddu wuxuu:-

1. Xaqiijinayaa wixii khilaaf ah ee u dhexeeya tirada u soo baxday Xafiiska Aftida ee Degmada iyo tan ku qoran diiwaanka goobta codbixinta, isagoo muujinaya haddii ay jiraan sababaha keenay.
2. Kula dhawaaqaya cod dheer tirada guud ee codbixiyaasha warqadaha codbixinta ee ansaxay iyo kuwa aan ansixin.
3. Kula dhawaaqaya cod dheer natiijada Aftida isagoo kala coddaynaya tirada codadka ogolaaday Dastuurka iyo inta diiday.
4. Ku qorayaa dhacdooyinka kor ku xusan oo dhan diiwaanka Xafiiska Aftida ee Degmada.

QODOBKA 39 AAD
DIB U DHIGIDDA KALA SHAANDHAYNTA

Hawlaha kala shaandhaynta warqadaha codbixinta ee goobta codbixinta, mar haddii la bilaabo waa in la dhammaystiraa oon la joojin.

Dhammaystiri waayo maalintaa gudaheeda, guddoomiyuhu wuxuu dib ugu dhigayaa **8.00** subaxnimo ee maalinta xigta.

QODOBKA 40 AAD
ISUGAYNTA NATIIJADA GUUD EE AFTIDA DEGMADA

Marka la dhammeeyo hawlaha goobta codbixinta degmada ee ku xusan qodobada hore ee xeerkan, Guddoomiyuhu wuxuu:-

1. Isugaynayaa guud ahaan tirade codka bixisay, warqadaha codbixinta ee ansaxay, kuwa aan ansixin, codadka ogolaaday Dastuurka iyo kuwa diiday ee goobaha codbixinta degmadaas.
2. Ku codddaynayaa cod dheer natiijada ku meel gaadhka ah ee ka soo baxday degmada, isagoo kala saaraya tirade oglaatay Dastuurka iyo inta diiday.
3. Ku ogaysiinayaa natiijadaas kor ku qoran lambar iyo farta Xafiiska dhexe ee Aftida.
4. Ku buuxinayaa diiwaan saddex nuqul ah hawlaha laga qabtay Xafiiska Aftida iyo natiijada ka soo baxday iyadoo wada saxiixayaan dhammaan xubnahaasi.

   Saddexda diiwaan: mid waxaa loo dhiibayaa Duqa ama Guddoomiyaha degmada, kuwa kalena- mid Maxkammadda sare ka kalena Xafiiska dhexe ee Aftida, la raacinayo kolay gaadh ah oo lingaxan ku jiraan dhammaan cabashooyinka soo gaadhay Xafiiska Aftida ee Degmada, dushiisa waxaa lagu qorayaa magaca goobta codbixinta ee dhacdadaasi khusayso.
5. Dhigayaa qalabka kale ee goobta iyo kuwa Xafiiska Aftida ee Degmada Qol gaadh ah, uu tilmaamayo Duqa ama Guddoomiyaha degmada lana xidhaayo lingaxna la saarayo, halkaana lagu ilaaliyo una yaallo Maxkamadda Sare inta ay ka ansixinayso Aftida.

QAYBTA VII

HAWLAHA XAFIISKA DHEXE EE AFTIDA

QODOBKA 41 AAD

DHISMAHA XAFIISKA DHEXE EE AFTIDA

Marka laga helo Guddiga Qaranka ee Aftida qalabka ku qoran qodobka 14aad ee xeerkan Guddoomiyaha Xafiiska dhexe ee Aftidu wuxuu:-

1. Isugu yeedhayaa xubnaha kale ee Xafiiska oo kala ah:-
   b) Guddoomiye kuxigeenka,
   t) Kaaliyayaasha
   j) Xoghayaha
   x) Tiriyayaasha.

2. Marka ay xaqiijiyaan isaga iyo xubnaha kale ee xafiiska in uu u dhan yihiin lingaxyadu qalabka, wuxuu furayaa saxaaradda, ka saarayaa hubinayaa qalabka ku jira.

3. Marka la xaqiijiyo u dhamidda lingaxa, wuxuu furayaa kolayga ay ku jirto shaabada Xafiiska.

4. u dhiibayaa Xoghayaha qalabka kale.

QODOBKA 43 AAD

HAWLAHA XAFIISKA DHEXE EE AFTIDA

1. Marka ay soo gaadhaan taararka ku xusan qodobka lambarka 3aad ee qodobka 40aad ee Xeerkan, wxuu tirinayaa kuna dhawaaqayaa natiijada guud ee meel gaadhka ah ee Aftida.
2. Marka ay soo gaadhaan diiwaanada iyo cabashooyinka ku xusan lambarka 4aad, qodobka 40aad ee Xeerkan wuxuu:-

   b) Go'aanka ka gaadhayaa si ku meel gaadh ah cabashooyinka iyo kuwa kale ee la soo gaadhsiiyey mar dambe xafiiska Dhexe ee Aftida.

   t) Isugaynayaa guud ahaan goobaha codbixinta ee Jamhuuriyada oo dhan tirade ka codbixisay warqadaha codbixinta ee ansaxay, kuwa aan ansixin, codadka ogolaaday Dastuurka iyo kuwa diiday.

Kadib, Guddoomiyuhu wuxuu ku caddaynayaa cod dheer natiijada ku meel gaadhka ah ee Aftida Dalka JSL oo dhan.

Dhacdooyinka kor ku xusan oo dhan, waxaa laga buuxinayaa diiwaan 2ba Nuqul ah oo midkood loo gudbinaayo Maxkamadda Sare si ay uga gudato hawlaheeda uu Xeerkani qeexaayo, waxaana la raacinayaa qalabka kale iyo cabashooyinka ka soo gaadhay Xafiiska Dhexe ee Aftida, Nuqulka kalena waxaa loo dirayaa Guddiga Qaranka ee Aftida.

QAYBTA VIII

CIQAAB

QODOBKA 43 AAD

ISHORTAAGIDDA BANDHIGIDDA AFTIDA

Qof kasta oo si kasta isku hor istaaga ama carqalad geliya hawlaha la xidhiidh Aftida ee ku qeexan (Qodobka 13aad) ee Xeerkan waxa lagu ciqaabayaa Xadhiga ilaa 3 sano ganaax ilaa 300,000 Sh. Sl.

QODOBKA 44 AAD

WAX U DHIMIDDA XORRIYADDA CODBIXINTA

1. Qof kasta oo qofka u ballan qaaday siiya lacag, ama wax qiimo ama waxtar gaadh ahaaneed u leh si kastaba iskugu daya inuu wax u dhimo xorriyadda codbixinta ee qofka, waxaa lagu ciqaabayaa xadhiga ilaa 2 sano ama ganaax ilaa 500,000 Sh. Sl.
2. Qofkii xaqiijinta ujeedooyinka kor ku qoran u isticmaalaya xoog, handidaad, khiyaamo, waxaa lagu ciqaabayaa, xadhig ilaa 3 sano iyo ganaax ilaa 300,000 Sh. Sl.

QODOBKA 45 AAD

IS-HORTAAGIDDA HABSAMI U SOCODKA

HAWLAHA CODBIXINTA

Qof kasta isagoo isticmaalaya, handidaad ama falal xoog ah, isku hortaaga isticmaalka xorriyada codbixinta ama carqaladeeyo habsai u socodka hawlaha codbixinta ee goobta Aftida ama kuwa kal shaandhaynta ee ka socda Xafiiska Degmada ee Aftida. Waxaa lagu ciqaabayaa xadhiga ilaa 3 sano iyo ganaax ilaa 300,000 Sh.Sl.

QODOBKA 46 AAD

GELIDDA FASAX LA'AAN GOOBTA CODBIXINTA IYO

XAFIISKA AFTIDA

1. Qof kasta oo ogsoon in aanu xaq u lahayn, inta ay socoto hawsha Aftida soo gla goobta codbixinta ama Xafiisyadda Aftida, hakadna geliyey hawlihii codbixinta waxaa lagu ciqaabayaa xadhig ilaa 9 bilood ama ganaax ilaa 120,000 Sh.Sl.
2. Haddii u qofkaasi hubaysan yahay waxaa lagu ciqaabayaa xadhig ilaa 2 sano ah ama ganaax ilaa 300,000 Sh.Sl.

QODOBKA 47 AAD

BEEN ABUUR, XADID QORAALO AMA WAX-KA-BEDELID

XISAABTA AFTIDDA

Qof kasta:-

1. Been abuura warqadaha codbixinta ama kuwa kale oo xidhiidha hawsha Aftida.
2. Waa ka bedela, xada, isku bedela qayb ama dhammaanteed.
3. Jeex jeexa qayb ama dhammaan, mid ka mid ah waraqadaha dhabta ah.
4. Ogaal u istacmaala warqado been ah, ama wax laga bedelay ama laysku bedelay, xataa haddii aanu ka qayb qaadan falkaa waxaa lagu ciqaabayaa 3 sano iyo ganaax ilaa 300,000sh.Sl.

QODOBKA 48 AAD

CODBIXIN AAN SHARCI AHAYN

1. Qof kasta oo og in aanu xaq u lahayn codbixinta ama magac aan kiisa ahayn isku soo taaga goobta codbixinta, amase ay sugnaato inuu bixiyey Hal cod ka badan amase qof iin leh si waafaqsan Qodobka 23aad ee xeerkan u wakiisho hase yeeshee uu si ka duwan ugu codbixiyo.

Waxaa lagu ciqaabayaa xadhig ilaa 1 sano ama ganaax ilaa 100,000 Sh.Sl.

2. Isla ciqaabta waxaa lagu qaadayaa qofkii:-

b) u ogolaada codbixin qof aan xaq ulahayn ama u diiday ka xaqa u leh.
t) si been abuur ah codbixiyaha ugu marrag fura.
j) lagu helo warqado codbixin ah oo ka duwan kuwa sharciga ah.

QODOBKA 49 AAD

FALALKA DANBI EE GALAAN XUBNAHA GUDDIGA

GOOBTA CODBIXINTA AMA XAFIISKA

1. Qof kasta xubin ka ah Guddiga goobta codbixinta ama Xafiiska Aftida gala falalka ku xusan qodobada sare ku qoran, waxaa lagu ciqaabayaa falalka oo lagu kordhinaayo (1/3).

QODOBKA 50 AAD

DIIDID XUBIN KA NOQOSHO GUDDIGA GOOBTA

CODBXINTA AMA XAFIISKA AFTIDA

1. Qof kasta oo loo magacaabay xilka xubinnimada Guddiga goobta Codbixinta ama Xafiiska Aftida sabab la'aan u diida xilka ama ka maqnaada kulanka Guddia goobta ama Xafiiska Aftida waxaa lagu ciqaabayaa ganaax ilaa 300,000 Sh.Sl.
2. Isla ganaaxaa waxaa lagu qaadayaa xubnaha kor ku xusan ee sabab la'aan ka taga inta ay hawsho socoto.

QODOBKA 51 AAD

AWOODDA QAADISTA DACWADDA

Dacwadaha la xidhiidha dembiyada Xeerkan ku xusan, waxaa qaadisteeda awood u leh Maxkaadaha caadiga ah iyadoo loo qaadayo si deg deg ah.

QAYBTA I X

QODOBO KALA DUWAN

QODOBKA 52 AAD

KORMEERKA HAWLAHA AFTIDA

1. Guddiga Qaranka ee qabanqaabada Aftida Dastuurka, ayaa leh masuuliyadda sare ee socodsiinta hawlaha Aftida.
2. Gudoomiyaha Gobolka, isagoo ka wakiila ah, guddiga kor ku qoran, wuxuu kormeeryaa, hibinayaa in ay hawlaha Aftidu ee gobolku ku dhammaanayaan muddadii loogu tala galay.
3. Sidoo kale heer degmo, waxaa hawsha u xilsaaran, Duqa ama Gudoomiyaha Degmada.

QODOBKA 53 AAD

MASUULIYADDA AMNIGA

Amniga iyo xasilloonida socodka hawlaha Aftida waxaa u xil saran Ciidanka Nabedgelyada, waxayna mar walba raacayaan awaamiirta iyo tusaalooyinka Gudoomiyayaasha, Gobolada, Degmooyinka iyo Guddoomiyayaasha Goobaha codbixinta iyo Xafiisyada Aftida.

QODOBKA 54 AAD

ANSIXINTA AFTIDA

Maxkamadda Sare ayaa awood u leh ansixinta hawlaha Aftida, waxayna ku dhawaaqayasaa muddo 10 beri gudahood, ka bilaamaysa maalinta Xafiiska Dhexe ee Aftidu soo saaro natiijada ku meel gaadhka ah Aftida oo kama dambaynta ah.

QODOBKA 55 AAD

NATIIJADA AFTIDA

1. Haddii ay dadweynuhu Somaliland uu Aftida Dastuurka ku ogolaado (HAA) in la qaato, Dastuurka waxaa soo saaraya Madaxeynaha JSL.
2. Haddii natiijada Aftidu noqoto (MAYA) diidana qaadashada Dastuurka, waxaa la diyaarinayaa Dastuur cusub oo muddo 6 bilood gudahood loo qaadi doono.

QODOBKA 56 AAD

DHAQAN GAL.

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa maalinta uu saxeexo Madaxweynuhu JSL, waxaana lagu faafinayaa faafinta rasmiga ah

Maxamed Ibraahim Cigaal

Madaxweynaha JSL